

Waa maxay Waxbarashada Gaarka ah?

Waa hab loo naqshadeeyo oo waxbarashada loo gaarsiiyo ardayda naafada ah Waxbarashadan waxaa si gaar ah u naqshadeeyay macalin leh Shahaadada Waxbarashada Gaarka ah oo ay taageeraan koox takhasus u leh

Waa maxay Qiimaynta?

Waxaa fulinaya cilmu-nafsiga dugsi, wuxuu na adeegsadaa habab imtixaan si uu u qiimeeyo qaybaha kala duwan ee shaqada, waxqabadka, iyo dhaqanka.

Ilmahaygu Miyuu U Qalmaa?

Ilmahaagu waa u qalmaa haddii qiimayntu ay muujiso dhammaan kuwan soo socda:

1. Ineey leeyihiin naafo
2. Naafadu waxay si xun u saamaysaa waxqabadkooda waxbarashadooda
3. Baahidooda gaarka ah waxay u baahantahay waxbarasho si gaar ah uu u habeeyey macalinka waxbarashada gaarka ah.

Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (IEP) Waa maxay?

Tani waa qorshaha waxqabadka sanadka soo socda. Waxa ay ka kooban tahay macluumaadka ku saabsan heerarka waxqabad hadda ee ardaygaaga. Hadafyada sanadka soo socda iyo faahfaahinta sida hadafyadaas loo gaari doono (sida loo qaabeeyay waxbarashada gaarka ah).

Waa maxay Kulanka IEP?

La qabto qiimaynta hore ka dib, halmar sannadkiiba.

Marka faahfaahinta IEP (Barnaamijka Waxbarashada ee La Shakhsi ahaaneeyay) laga wada hadlo lagana heshiiyo. Waa inay shirka ay joogaan jiraan wakiillo gaar ah , oo ay ku jiraan:

- Macalinka waxbarashada gaarka ah
- Macalinka waxbarashada guud
- Wakiil ka socda dugsi degmada (badanaa maamulaha)
- Khabiir tarjumi kara natiijooyinka qiimaynta (sida caadiga ah khabiirka cilmu-nafsiga dugsiyada)
- ADIGA! (iyo qof kasta oo aad doorato inuu kula yimaado)
- Bixiyeyaasha adeegyada dugsiyada ee habboon ee kale

Haddaba, Maxaa dhacaya marka xigta?

IEP-ga Ilmahaaga **ayaa dib loo eegi doonaa sanad walba** waxaana lagugu casuumi doonaa kulanka IEP. Saddexdii sano **ee kasta waxa jiri doona dib u qiimayn.**

Sidee Ayeey U Egtahay Maalinta Dugsiga?

Ardeyda helaya adeegyada waxbarashada gaarka ah waxa uu heli doonaa waxbarid si gaar ah loogu habeeyay oo ah jawi u sahlaya in ay gaadhaan hadafyadooda iyo ujeedooyinkooda gaarka ah. Tani waxay ka dhigan tahay inay heli doonaan fursado badan oo ay wax ku bartaan iyagoo sidoo kale sida caadiga ah horumarinaya asaagooda fasalka waxbarashada guud. Meelaha qaarkood waxay baran doonaan nuxurka waxbarashada guud oo kuwa akle neh waxay ku baran doonaan, nuxurka waxbarashada gaarka ah. Waxay dhammaan ku xiran tahay baahidooda gaarka ah.

BALLANQAADKA Highline Public School waa in uu hubiyo in arday KASTA lagu yaqaan magaca, xoogga iyo baahida.



HIGHLINE
PUBLIC SCHOOLS